

Fasaxa Mushaarka leh ee Minnesota - Waqti u hel xiliyada nolosha ugu muhiimsan



Reer Minnesota way is daryeelaan. Laga bilaabo Janaayo 2026, Fasaxa Mushaharka leh wuxuu xaqiijin doonaa in Reer Minnesota ay qaadan karaan waqtiga ay u baahan yihiin si ay uga qeyb qaataan waqtiyada ugu muhiimsan ee nolosha—sida soo dhaweynta ilmo qoyska ku cusub, ka soo kabashada xanuun halis ah, ama daryeelidda qof aad jeceshahay.

Daboolista Fasaxa Mushaarka leh

Fasaxa Mushaarka leh wuxuu bixin doonaa lacag-bixinno iyo ilaalinta shaqada ee:

Fasaxa Caafimaadka

1-12 isbuuc



Xaalad caafimaad oo halis ah oo qofku leeyahay

Fasaxa Qoyska

1-12 isbuuc



Xiriirinta ilmo cusub



Daryeelka qof aad jeceshahay



Maareynta arrimaha degdegga ah ee la xiriira milatariga



Xaaladaha qaarkood ee la xiriira badqabka shaqsiga

Ugu badnaan 20 isbuuc isku dar hadii qof uu u qalmo labadaba Fasaxa Caafimaadka iyo Fasaxa Qoyska.

Dadka intooda badan ee ka shaqeeya Minnesota iyo shirkadhooda waxay heli doonaan Fasaxa Mushaharka leh.

Lacagta Fasaxa Mushaharka leh

Marka aad fasax qaadato sababaha la oggolyahay, waxaa lagu siin doonaa qayb ka mid ah mushaarkaaga caadiga ah. Lacagtan waxay ku salaysan tahay dakhligaaga sannadkii hore.

Ilaalinta shaqadaada

Fasaxa Mushaharka leh wuxuu kuu xaqiijinayaa inaad shaqadaada dib ugu laaban karto fasaxa ka dib. Haddii aad shaqadaada ka shaqeynaysay ugu yaraan 90 maalmood, shaqadaada waa la ilaalinayaa marka aad dib u soo laabato.

Sidee loo maalgelinayaa Fasaxa Mushaharka leh?

Fasaxa Mushaharka leh waa barnaamij caymis bulsho. Labada dhinac—shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha—waxay iska bixin doonaan caymis si ay u taageeraan barnaamijkan.

Waxaad wax badan ka ogaan kartaa shuruudaha, daboolidda, lacagaha, iyo faahfaahinta kale ee Fasaxa Mushaharka leh: info.paidleave.mn.gov

